SOMALI

# Carruurta yaryar cudurrada iyo caabuqyada ugu badan

**Haddii aad ka welwelsan tahay xaaladda ilmahaaga, la xiriir xaruntaada caafimaadka ee kuu gaarka ah.**

**Xaaladaha degdegga ah wac heeganka isbitaalka lambarka 116 117.**

**Xaalad degdeg ah ku wac lambarka gurmadka degdegga ah 112.**

Lifaaqyada iyo macluumaad dheeraad ah:

Duodecim Terveysportti. https://www.terveysportti.fi

Terveyskylä. https://www.terveyskyla.fi

Hay'adda Caafimaadka iyo Daryeelka Wanaagga (THL). Cudurrada faafa iyo tallaalka.
https://thl.fi/en/topics/infectious-diseases-and-vaccinations/diseases-and-disease-control

Sawirro:

Niitty 2 -mashruuc. Terveyskylä. Pixabay. Adobe Stock, Education License.

Euroopan unionin osarahoittama

Niitty2

Tampereen ammattikorkeakoulu

TAMPERE

Pirkanmaan hyvinvointialue

## HARGAB

**Calaamadaha:**
Duuf, qufac, hindhiso, xanuun cunaha ah, qandho. Calaamaduhu badanaa waxay socdaan 1–2 toddobaad.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
• Sanka xiran si joogto ah u nadiifi, tusaale ahaan adigoo adeegsanaya qalabka nuugista sanka.
• Ku rid dhibco cusbo ah ama buufin cusbo ah sanka.
• Qufaca u sii malab fiidkii 2 qaado yar ka hor hurdada (kaliya carruur ka weyn 1 sano).
• Sii dawo xanuun iyo qandho haddii ilmuhu xanuunsanayo ama qandho leeyahay.
• Sii cabitaan badan

**U tag qiimeyn dhakhtar haddii:**
• neefsashada ilmaha adkaato.
• qandhadu kor u kacdo (ka badan 40°C) ama qandhadu socoto in ka badan shan maalmood.
• ilmuhu xanuunsanayo ama xaaladdiisa guud daciifto.
• calaamadaha hargabku socdaan in ka badan laba toddobaad.

Mararka qaarkood qandho sare waxay sababi kartaa suuxdin qandho.
• Jirka ilmuhu wuu adkaan karaa gacmihiisa iyo lugihiisuna si degdeg ah bay u ruxmi karaan.
• Neefsashaduna way cuslaan kartaa.
**Haddii ilmuhu suuxo, wac lambarka gurmadka degdegga ah 112.**





## CAABUQ INDHAHA

Waxay caadi tahay inta harganku hayo ama ka dib marka uu dhammaado.

**Calaamadaha:**
• xanuun dhegta, cunto-xumo, maqalka oo yaraada, dhegta oo la xoqo, xasillooni darro
• Xanuunku badanaa habeenkii ayuu bilaabmaa.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
• Sii dawo xanuun haddii loo baahdo ama dhibco dhegta oo xanuun baabi'iye ah.

**Haddii aad ka shakisan tahay in ilmaha uu qabo caabuq dhegta, u tag qiimeyn dhakhtar.**

## CAABUQ DHEGTA

Waa caadi inta uu hargabka hayo.

**Calaamadaha:**
• indhaha oo casaada iyo dheecaan ka yimaada
• baalasha indhaha oo barara oo casaada

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
• Indhaha ku nadiifi biyo diirran iyo maro suuf ah.
• Indhaha ka tirtir geeska dibadda ilaa geeska gudaha. Isticmaal maro cusub mar kasta.

**U tag qiimeyn dhakhtar haddii:**
• calaamaduhu sii socdaan in ka badan 2–3 maalmood
• indhuhu xanuunayaan
• aragtidu daciifto



## SHUBAN IYO MATAG

Si fudud ayuu u faafo, xasuuso nadaafadda gacmaha.

**Calaamadaha:**
- Shuban iyo matag, xanuun caloosha ah iyo qandho.
- Mataggu badanaa wuxuu socdaa 1–2 maalmood, shubankuna toddobaad ayuu socon karaa.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
- Ilmaha sii cabitaan ku filan. Biyaha ka sokow sii cabitaan kale sida casiir khafiif ah. Sii wax yar markiiba.
- Haddii shubanku ama mataggu badan yahay, sii cabitaan dib-u-qoyaaneed oo farmashiyaha laga helo.
- Ilmaha sii bakteeriyada caanaha.

**U tag qiimeyn dhakhtar haddii:**
- ilmuhu cabitaan ku filan qaadan waayo.
- kaadidu yaraato ama calaamado qallayl muuqdaan.
- qandho kacsan ama xanuun caloosha ah oo daran.
- saxarada dhiig la socdo.
- ilmuhu aad u daalan yahay oo adag tahay in la toosiyo.
- ilmuhu qabo cudur kale oo aasaasi ah.





## CAABUQA HUNGURIGA HOOSE

**Calaamadaha:**
- Cod xabeeb ah, neef qaadasho sanqadh leh, qufac u eg qaylo eey, mararka qaar qandho.
- Calaamaduhu badanaa habeenkii ayey bilaabmaan marka ilmuhu jiifo.
- Calaamadaha ugu daran badanaa waxay socdaan 2–3 maalmood.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
- Ilmaha u dhig meel kor loo qaado.
- Hawo qabow oo nadiif ah daaqad furan agteeda ama bannaanka.
- Sii dawada xanuunka iyo qandhada haddii loo baahdo.

**Haddii dhibaatada neefsashada ilmaha ay sii socoto, u tag dhakhtar si loo qiimeeyo.**

## IMPETIGO

Caabuq maqaarka ah oo ay keento bakteeriyo. Si fudud ayuu u faafaa.

**Calaamadaha:**
- Finan biyo leh, qolof iyo casaansho maqaarka ah, badanaa agagaarka afka iyo sanka, gacmaha ama laalaabka maqaarka.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
- Haddii finanku yar yihiin, guriga ayaa lagu daweyn karaa.
- Qolofka ku jilci biyo kadibna qalaji maqaarka.
- Mari kareem qalajiye ah oo farmashiyaha laga helo.

**U tag qiimeyn dhakhtar haddii calaamado badani jiraan.**



## XANUUNKA DIIRKA EE CARRUURTA (ROSEOLA)

Cudur ku dhaca carruurta ka yar 2 sano, iskiis ayuu u bogsadaa.

**Calaamadaha:**
• Qandho kacsan, kadib finan casaan ah.
• Calaamado u eg hargab.
• Shuban.
• Indho casaansan iyo baalasha indhaha oo barara.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
• Sii dawo qandhada iyo xanuunka.
• Sii cabitaan ku filan.



## CUDURKA GACANTA, CAGTA IYO AFKA

**Calaamadaha:**
• Finan biyo leh afka, wajiga iyo gacmaha, mararka qaar finan xafaayadda agteeda.
• Qandho, calaamado hargab, cune xanuun, madax xanuun, shuban.
• Qiyaastii toddobaad ayuu socdaa, iskiis ayuu u bogsadaa.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
• Sii dawada qandhada iyo xanuunka.
• Afka ilmaha wuu xanuuni karaa. Cunto qabow iyo dareere ah ayaa fududeeya cunista.

**U tag dhakhtar haddii cunista iyo cabista xanuun awgiis u suurtageli weydo.**





## BUSBUS

Si aad ah ayuu u faafaa. Iskiis ayuu u bogsadaa. Waxay sababi kartaa cudurro daba socda oo halis ah. Tallaalka busbusku wuxuu ka mid yahay barnaamijka tallaalka guud ee carruurta.

**Calaamadaha:**
• Finan cuncun leh oo isu beddela finan biyo leh.
• Qandho.
• Calaamaduhu qiyaastii toddobaad ayay socdaan.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
• Sii dawada xanuunka iyo qandhada haddii loo baahdo.
• Cuncunka waxaa lagu yareyn karaa kareem farmashiyaha laga helo.

**U tag dhakhtar haddii:**
• ilmuhu qabo qandho sare (ka badan 40°C).
• ilmuhu qabo xanuun daran.



## INJIR



Waxay ku noolyihiin maqaarka madaxa iyo timaha.
Qiyaastii 2–4 millimitir dhararkooda.
Ukunta injirtu waxay u egyihiin qolofta madaxa.

**Calaamadaha:**
• Cuncun maqaarka madaxa, mararka qaar finan casaan ah.
• Sidoo kale waxay ahaan kartaa calaamado la'aan.

**Tilmaamaha daryeelka guriga**:
• Injirta iyo ukunteeda ka saar timaha adigoo adeegsanaya shanlada injirta oo farmashiyaha laga helo.
• Dhaq timaha iyo maqaarka madaxa adigoo adeegsanaya shaambada injirta, ku celi haddana toddobaad kadib.
• Nadiifi guriga, gogosha iyo tuwaallada beddel.
• Dharka iyo gogosha ku hay meel kuleelkeedu ka badan 80°C laba saac ama ku rid qaboojiyaha habeenka oo dhan.
• Koofiyadaha, shanlooyinka iyo burushyada dhaq.

## GOORYAAN DIRXIYEED

Waxay ku noolyihiin mindhicirka.
Qiyaastii hal sentimitir dherer ah, dirxi khafiif ah.
Carruurta ku badan, si fudud ayay u faaftaa.

**Calaamadaha:**
• Cuncun dabada agteeda, mararka qaar finan barida ah.
• Saxarada dusheeda dirxi khafiif ah oo qiyaastii hal sentimitir ah.

**Tilmaamaha daryeelka guriga:**
• Qoyska oo dhan hal mar ku daawee dawada farmashiyaha laga helo. Ku celi haddana laba toddobaad kadib.
• Nadiifi gogosha iyo tuwaallada, guriga nadiifi.
• Qalabka ciyaarta ku nadiifi kulayl ka badan 80°C laba saac ama qaboojiyaha habeenka oo dhan.
• Cidiyaha gaabi.